

# JOOJIYASHA LAMUSNAANTA





**Shaqada wadajirka ah ee:**

*Asociación Más Mujeres and Save a Girl Save a Generation*

**Qoraalka:** Anna Maria Porté Estop

**Sawirada:** Sara Fratini


**Naqshad:** María Ramis

**Nuqa Ingiriisiga:** Natalia Fernández Díaz-Cabal

## JOOJIYASHA AAMUSNAANTA

Sheekadani waxay ku saleysan tahay dhacdooyin dhab ah. Gudniinka haweenka waa dhaqan ay weli kumannaan dumar iyo gabdho dunida oo dhan ay ku dhiban yihiin maanta. Si kastaba ha ahaatee, dumar aad u tiro badan ayaa maanta awood u helaya inay ka xoroobaan.





Asha waxay weydiisay walaasheed ka weyn, Zuli, Maku xanuunaysaa? Aniga weli aad bay ii cuncunaysaa. Zuli madaxa ayay hoos u dhigtay, way jeesatay, kadibna way socotay iyadoo cagaha jiidaysa.

Waxyaabo badan ayaa is beddelay tan iyo markii Asha ay ka soo laabatay safarkii ay hooyadeed la tagtay tuulada ayeeyadeed. Subaxaas way faraxsanayd. Waxaa loo sheegay in ay tahay maalin gaar ah, in ay weynaatay, waxaana loo diray in ay soo iibiso sakiin. Kadibna arrintii way dhacday. Aad bay u xanuunsatay. Ilaa haddana weli way cuncunaysaa. Waxay isku dayday in aanay xusuusan.

Markay indhaha isku xidhay, waxay xasuusatay iyada oo dhulka jiiifta. Dhulku wuu qabowaa, dhagxaan yaryarna dhabarka ayay kaga mudmayeen. Maradii daaqadda saarnayd waxay hadh ka samaynaysay darbiyada dhoobada ah. Faraha way kabuubyoobeen sababtoo ah waxaa lagu xiray xarig. Duqsiyo ayaa ku wareegayay qolka. Waxay dareemaysay dhidid qoorteeda ka qulqulaya. Markaas ayay maqashay codka sakiin wax jaraysa. Waxay aragtay irbad iyo dun. Way ooyday, waxayna rabtay inay cararto, laakiin awood uma ay lahayn.

Arrintaasi waxay ku dhacday Asha, ka hor iyadana ayeyyadeed, hooyadeed iyo walaasheed. Dhammaan dumarka qoyska. Xitaa waxaa laga yaabaa in ay ku dhacday haweenka deriska ah oo dhan. Laakiin Asha ma ay ogeyn, sababtoo ah cidina kama hadlin arrintaas.

Waxay isku deyday marar badan inay arrintaas kala hadasho Zuli. Maalin maalmaha ka mid ah, Zuli oo basal jaraysay si ay bariis ugu kariso, ayay mar kale waydiisay walaasheed: Zuli, weli miyaa ku dhibaysa? Ma dhammaan doontaa maalin uun? Zuli waxay farta ku fiiqday dhulka, waxay siisay basal, waxayna ku tidhi: “U jar qaybo yaryar.”

Wax yar ka dib, Asha waxay aragtay walaasheed oo sanko is tirtiraysa. Waxay si taxaddar leh u fiirisay iyada oo arkaysa farahi dhaadheera ee dhuubana ee walaasheed oo maro midabbo leh ku haysa si ay sankeeda ugu tirtirto. Waxay fiirisay wejigeeda, indhaheedu way illimeeyeen. Zuli si hoose ayay u tidhi: “Basashu mar walba way iga oohisaa.” Indhaha Asha iyaguna way bilaabeen inay ooyaan. Labadooduba way sii wadeen jarista basasha iyaga oo ooyaya. Walaasheed marna kama ay jawaabin su’aashii Asha.



Asha ma fahmin nooca dabbaal-degga ah ee ay ahayd. Ma ay jeclayn. Gabi ahaanba. Inkasta oo ayeeyadeed u sheegtay: Hadda waxaad tahay gabar weyn. Maalmo ayaa dhaafay, haddana weli way xanuunaysay marka ay socoto, marka ay dhaqaaqdo, iyo marka ay kaadido. Way cuncunaysay. Waxay hooyadeed weydiisay, iyagoo biyaha ka soo doonanaya ceelka, waxa ay samayn karto. Hooyadeedna waxay ku jawaabtay: Ku mayr biyo kulul iyo cusbo. Asha way is mayrtay biyo aad u kulul oo ku dhowaaday inay gacanteeda gubaan, balse waxba ma ay dareemin. Cuncunku ma uusan istaagin—taas beddelkeed, wuu sii gubtay

Asha waxay u malaynaysay in marka ay weynaato, baaldigu uusan u culaysnaan doonin marka ay biyaha soo qaadato. Laakiin iyada oo shan jir ah—ama sida ay iyadu u malaynayso inay shan jir tahay, iyada oo ku salaynaysa dhererka gabdhaha kale ee iskuulka taga—haddana si dhab ah uma oga goorta ay dhalatay. Si kastaba ha ahaatee, marar badan ayay istaagtaa, maadaama ay daasho, waxayna xasuusataa maalintii ay kuftey, sababtoo ah weli way xanuunaysaa marka ay socoto, biyhiina way ka daaddeen. Waxaa laga yaabaa in ayeeyadu qaldanayd. Waxaa laga yaabaa inay weli tahay gabar yar.”



Qoomiyadda Soomaaliyeed waa qayb ka mid ah bulshada Kenya, qoyska Asha-na wuxuu ka tirsanaa qoomiyaddaas. Carruurnimadeedii, Asha waxay ku noolayd magaalooyin iyo tuulooyin kala duwan. Markii waalidkeed kala tageen, qoyska sidoo kale wuu kala firdhay; hooyadeedna waxay ku qasbanaatay inay shaqo raadsato si ay u hesho meel ay ku noolaato. Maalmaha maalin ka mid ah, walaalkeed ka weyn ayaa loo geeyay adeerkood si uu u daryeelo. Wax yar ka dib, walaasheedna sidaas oo kale ayaa loogu geeyay habaryarteed. Ugu dambayntiina, Asha iyadana waxaa loo geeyay habaryar kale si ay halkaas ugu noolaato. Markay hooyadeed ka tagaysay, waxay ku tiri: 'Hooyo macaan, dhabannadaadu waa kuwo qurux badan—kuwa dhunkasho loogu talagalay, ee aan dharbaaxo loogu talagelin. Waligaa ha illoobin taas.

Asha waxay u xiistay qoyskeedii. Mararka qaarkood hurdadu way ku adkaan jirtay. Waxay is weydiin jirtay in ay mar kale hooyadeed arki doonto, in walaalkeed weli xusuusan yahay, iyo in Zuli ay weli sheekooyin u keydinayso si ay ugu sheegto marka ay mar kale is arkaan. Ma ay fahmin sababta ay dhammaantood ugu qasbanaadeen inay kala fogaadaan. Gurigaas aad uma ay jeclayn—in kasta oo ay is lahayd, haddii roob yar oo dheeraad ah da'o, boodhku uusan meel walba ka jirin, laga yaabee inuusan sidaas u xumaan lahayn. Iyadu waxay ahayd tan ugu yar, qof walbana iyada ayuu wax u diri jiray. Waxay jeclaan lahayd inay iskuul tagto si ay wax u barato.

Waqti ayaa ka soo maray, qoyska ayaa dib u midoobay. Asha waxay jeclayd geedka cambaha ee ka baxa guriga agtiisa. Ka dib sanado badan oo ay kala maqnaayeen, hooyadeed waxay ula muuqatay qof shisheeye ah. Asha iyo Zuli wakhti badan lama qaadan jirin iyada. Wakhtiyada cuntada, waxay aadi jireen guriga habaryartood. Waxay bariiska kulul ku qaadan jireen labada calaacalood ee gacmahooda iyaga oo isku haya, farahana ka gubanayaan, ka dibna waxay ula orodi jireen hooska geedkii cambaha ee duqqa ahaa, iyaga oo qoslaya. Wuxuu ahaa geed cambe ah oo weyn, oo keligiis meel ka baxey, aad bayna u jeclaayeen.



Asha way yara calool-xumaatay. Walaalkeed wuxuu maamuleyey xisaabaadka muddo sanado ah, walaasheedna waxay ku qori jirtay erayo aysan akhrin karin sagxadda barxadda. Waxay ku daashay sugitaanka imaanshaha waqtigeeda. Ma ay awoodin inay dugsiga aaddo intii ay joogtay guriga habaryarteed. Waxay u cadhootay hooyadeed. Hadda ma ay ahayn gabar yar. Waxay rabtay inay ogaato. Jirkeedu wuu is beddelayay, waxayna aaminsanayd inay jawaabo ka heli karto meel ka baxsan aamusnaanta ku hareeraysnayd.



Bulshada dhexdeeda si wanaagsan looma arki jirin in haweeney, gaar ahaan mid garoob ah oo carruur haysata, ay keligeed ahaato. Iyadu waxay lahayd saddex carruur ah, laba gabdhood iyo wiil. Sidaas darteed, waxaa lagu taliyay inay mar kale guursato. Hooyadeedna way aqbashay taladaas, waxayna mar kale guursatay. Asha waxay yeelatay walaal yar oo cusub. Aad bay u jeclayd inay la ciyaarto oo ay daryeesho. Laakiin markii aabbaha walaasheed uu ka tagay mar kale, waxay dib ugu noqdeen inay kelidood la noolaadaan hooyadood, mar kalena way guureen. Hadda waxay ku noolaayeen meel u dhow aabbaha Asha, kaas oo mararka qaarkood soo booqan jiray, kuna cuni jiray guriga isaga iyo qaraabo kale oo uu martiqaadi jiray. Asha way ka daashay inay mar walba noqoto tan ugu dambaysa, inaysan wax baran karin, inay sugto oo u adeegto cuntada ay ragga qoyska iyo saaxiibadoodu ku cuni jireen roogga weyn. Wixii hadhay ayaa iyada, walaalaheed iyo hooyadeed loo reebi jiray. Ilaa maalin ay ku fadhiisatay roogga oo ay tiri: “Ma doonayo inaan mar dambe gaajo dareemo.”



Asha looma dhalin in wax laga mamnuuco. Mararka qaarkood in lagu yiraahdo “maya” ayaa ku filnayd si ay u istaagto oo ay u samayso wixii loo arkayay wax aan suuragal ahayn, si ay u muujiso waxa ay awood u leedahay. Sidaas darteed ayay u jebisay xeerarkii, waxayna maalintaas ku fadhiisatay rooggii ay raggu ku cuni jireen. Hooyadeed aad bay uga xanaaqday, sababtoo ah waxay u aragtay in gabadheedu ay edeb darro samaysay. Laakiin Asha ma ay dareemin ceeb, ee waxay dareentay gaajo. Haddii cunto loo heli karo ragga, dhammaan reerka oo dhan waa in ay heli karaan. Qofna mar dambe rooga lagama eryl doono. Laga bilaabo maalintaas, hooyadeed waxay cuntada marka hore siin jirtay gabdhaha, ka dibna ragga.



Malintaas kadib, Asha meey noqonin qofka fasalka ugu dambeeyo. Waxaay isbartaay sida loo aqriyo, waxaayna ogaatay maktabadda – meel iftiin iyo sheekooyin ay ka buuxaan. Halkaas ayay joogi jirtay ilaa wakhtiga xidhitaanka, iyado akhrineyso buug kasta oo ay gacanta ku dhigto. Eraya ayay u ubaahneed. Laakiin xamaasadeeda waxbarasho lagama fahmin guriga. Iyada oo ay sugayiin hawlaha guriga iyo rajooyin aay fuliso, jacaylka ay u qabto wax-barashada ayaa loo arkayay mid kamashquuliya. Anshax badan iyo buugaag yar!, qoyskeeda ayaa kadalbaday. Galab kasto marka aay kasoolabato maktabadda, waa la ciqaabi jiray. Weli, waay kusii labaneysay. Wax badan oo ay baratay, waxay kusii qancaysay in gabar kasta ay u qalanto fursad la mid ah tan ay heshay. Marna ma quusan doonin. Maalin maalmaha ka mid ah, macallin ayaa booqday qoyskeeda, wuxuuna yidhi: Gabadhani waa mid niyad adag oo caqli badan. U ogolaada in ay wax barato – qiimo weyn bay leedahay.”

Xiligaas wadanka Kenya, ilmuhu wuxuu dugsiga bilaabi karaaye keliya marka ay gacanta midig madaxa ka dul mariyo oo uu taabto dhegta bidix, ama gacanta bidix ku taabto dhegta midig. Sanado badan, Asha si fudud ayay u gaadhi jirtay dhegteeda, balse kaliya codsiyo joogto ah ka dib ayay u suurto gashay in la geeyo iskuulka, way ka waynayd dhammaan carurta kale ee fasalkeedha – waxayna ehed qofka ugu aqoonta yaraa. Dhamaadka xilli-dugsiyeedkii ugu horreeyay, fasalka ayay ka gashay kaalinta ugu dambaysa. Ardayda kale ayaa kuqosqosleen, ayakoo ka kadigteen bartilmaameed kaftan aan kala joogsi lahayn. Waxaay guriga kusoolabataay iyadoo ilmeynaysa. Walaasheed ka weyn oo xanuunkeeda dareentay, ayaa u dhiibtay buug cinwaankiisu ahaa “Through the Garden Gate” iyadoo ku leh: haddi aad rabto in aad baratid sidhaa looqriyo, buuggan akhriso. Marka aad barato, cidna mar dambe kuguma qosli doonto.”



Ciqaabtii way dhammaatay. Qoyskeeduna waxay bilaabeen inay arkaan awooddeeda, waxayna bilaabeen inay ka fikiraan sidhi ay ugu garab istaagi lahaayeen waxbarashadeeda. Iyadoo markii hore ahayd tan ugu hooseysa fasalka, waxa ay noqotay mid ka mid ah ardayda ugu sareyse gobolka oo dhan. Waxaay kuguuleysate deeq-waxbarasho oo aay ku aade iskuul hoyga ah – riya ayaa u rumoowday. Boorsadeedii ugu horeeysay. Shukumaan u gooni eeh, caday, armaajo iyo sariir. Maalmo, dimple-ka ku taala dhabankeeda bidix ayaa muuqday farhaad joogta darted. Iskuulkas hoyga ah, iyadoo ku hareeraysan yihiin gabdho waqti kasta haysan jiray wax walba, Asha waxay la timid hal goaan: inay wax barato.



Waxay ku guuleysatay inay qof walba ka dhaadhiciso in ay tahay gabadh ladhalatay jeneral Soomaaliyeed oo muhiim ah – gabadh kale oo ka mid ah kuu badan. Laakin maalin maalmaha ka mid ah, iyadoo kujirta qubeyska iskuulka, run adag ayaa kuso dhacday qalbiga. Gabdhaha kale way ka duwanaayeen. Sababtoo maaha inti aadaan kaniisada Protestant maalin kasta ama in aay haysteen kabo iyo buugaag badan, balse sababtoo ah gabdaha kale ma soo marin wixii iyadu soo martay.

Qolka marki kulabatee, sariirta ayaay kudul dhacday, waay murugeysneed. Waay xanaaqdhey. Markaas ay fikrad ku soo dhacdey: sug— oo taas miyaay gabdaha kale kudicin? Maxaay anni igugu dhacdey? Qof aay weydisa majirin. Waxay bilowday inay baarto, iyada oo kabaadhaysa buug kasta oo ay hesho, iyada oo rajaynaysa inay hesho sharaxaad. Laakin buugagtas wax jawaab maysiin. Murugo iyo jab aad u weyn ayeey dareentay. Maxay waxaas iigu sameeyeen? Waxay ahayd jirkeeda, sirteeda, nolosheeda. Qofna xaq uma lahayn inuu u keeno xanuunkas oo kale. Micna ma lahayn ileen marwalba la samayn jiray. Ama odayaashu aa dheheen “waxay u wanaagsan tahay gabdhaha.” Sax may ahayn.

Noolasheedha abid ayaay badaleen. Haddana way ogaatay inaysan ahayn inay sidaas noqoto. Waad kori kartaa, jidhkaagu si dabiici ah ayuu isu bedeli karaa – qofna xaq uma lahayn inuu go'aamiyo sidha jidhka dumarka uu noqonaayo. Weligeed. Qofna. Meel kasta oo dunida ah.

Markii fasaxa dugsiga la gaaray, Asha waxay ku laabatay tuulada si ay halkaas ugu joogto maalmo yar. Si ay u hesho xoogaa lacag ah oo ay ku daboolato baahiyaha aasaasiga ah ee iskuulka, waxay bilowday iibinta sambuuska. Sambuusku waa bur la duubay oo laga buuxiyo hilib shiidan, khudaar iyo xawaash. Subax ka mid ah, Asha waxay maqashay hooyadeed oo doonaysa inay walaasheed ka yar geysa isbitaalka. Waxay u socdeen in lagu sameeyo wixii hablaha lagu sameeyo—waxii iyada iyo walaasheed Zuli horay loogu sameeyay. “Maya!” ayay Asha qaylisay. Waxay isku deyday inay joojiso. “Walaashay yar maya! Marnaba!” Qolka ayaa lagu xiray. Saacado ayay albaabka garaacaysay, iyadoo qaylinaysa ilaa ay daashay. Markii ugu dambayntii qolka laga soo daayay, hooyadeed ayaa si deggan ugu tidhi: “Hadda xanuun badan ma aha. Isbitaalka ayaa lagu sameeyaa.” Asha waxay isku duubtay walaasheed. Indhaheeda kama qaadi karin. Si xooggan ayay u haysatay iyadoo ooyneysa. Maxay hooyadeed ula jeedday? Haddii isbitaalka lagu sameeyo, miyaa ay fiicnaanaysaa? Taasi ma ka dhigaysaa mid caadi ah? Imisa gabdhood oo kale ayaa sidaas lagu sameeyay—kuwa aan ahayn walaasheed, kana baxsan tuuladeeda? Laakiin sababtu maxay tahay? Xanuun aan dhammaanayn. Iyo qayb ka mid ah jirkeeda oo ka maqnaan doona weligeed.


Asha uneheeda ayaa gubtay—ma ahayn qaylo awgeed, balse dabka gudaha kaga shidmay dartii. Waqtigaas ka dib, hadal uma harin. Cod ay walaasheed ugu dodo kuma harin.





Asha waxay doonaysay inay ka baxdo xaaladda ay ku jirtay. Intii ay uurka lahayd, waxay bilowday inay ka shaqayso guryaha qaraabo iyo dad ay qoyska yaqaaneen, si ay u hesho xoogaa madax-bannaani ah. Qorshaheedu wuxuu ahaa inay ka tagto ninkaasi marka ilmuhu dhasho. Waxay dadaashay, way shaqaysay, wax bay baratay, lacagna way kaydsatay. Ugu dambayn, waxay dhashay gabar yar. Dhalmadaasi aad bay u adkayd, mana aha wax ay rabto inay xusuusato ama ka hadasho, sida ay u adkayd awgeed. Laakiin markii ay aragtay wejiga gabadheeda, qalbigaedu wuu is beddelay. Waxay nafteeda u ballanqaadday in Hayat ay ku kori doonto nolol ka xor ah tan ay iyadu soo martay.

Asha waxay rabtay inay noqoto weriye idaacad ka hadla. Waxay doonaysay inay jaamacad aaddo si ay u barato saxaafadda, una sheegto sheekooyinka nolosha ee idaacadda. Laakiin guriga lacag ma jirin, sidaas darteed qoyska ayaa u guuriyay nin ka weyn oo ku noolaa Muqdisho, caasimadda Soomaaliya. Markii la ogaaday in ay uur leedahay, qoyska ninkeeda ayaa bilaabay inay daryeelaan, maadaama ay hadda uur u lahayd ilmo ay arkayeen inay iyagu leeyihiin.



Asha waxay isbuucyo yar, laba toddobaad ama wax la mid ah ugu laabatay Kenya si ay u soo booqato qoyskeeda, iyada oo aan la socon Hayat, sababtoo ah aabbaheed ma u oggolaan inay gabadha dalka ka saarto. Qoyska ay u shaqaynaysay ayaa ballanqaaday inay ka caawin doonaan inay nolosheeda beddesho. Baasaboorradii waa la diyaariyey, qorshuhuna wuxuu ahaa inay marka ay soo noqoto qaadata gabadheeda, kadibna ay u guuraan Danmark.

Laakiin wax walba way burbureen. Dagaal ayaa qarxay, xuduudihii waa la xiray, Hayatna way ku xannibantay. Asha maskaxdeedu way wareertay. Xuduuddu way xirnayd, wax war ahna kama haysan gabadheeda. Shaqo ma ay lahayn, wax kayd ahna ma jirin. Waxay aad ugu dhoweyd inay gaadho yoolkeeda—kadibna wax walba way qarxeen.

Asha ma ay awoodin inay seexato, inay wax cunto, inay nasato fikir iyo welwel darteed. Dagaalkii xumaa wuxuu mar kale ka qaaday wax walba. Waxay heshay warqad ka timid inaanteeda aabbeed. Wuxuu isku dayi lahaa inuu ilmuhu keeno xadka—laakiin ma suurtoobi doontaa in Asha ay gabadheeda dalka ka saarto? Way niyad jabtay. Waxba uma harin. Lacagtii ay kaydsatay waxay ku qarsoonayd furaash ku yaallay Muqdisho.

Zuli waxay si toos ah indhaha uga eegtay, waxayna ku tidhi: “Waxaan u soconnaa inaan gabadhaada raadino. Waxaan iibinayaa dahabkayga. Waxaan u safri doonnaa ilaa xadka, waan heli doonnaa inanteenna, hadduu Ilaahay idmo





Waxay la safreen gaadiidkii gargaar u waday dadka qaxootiga ah ee ku soo ururay xadka, maadaama aysan haysan lacag ku filan oo ay ku raacaan nooc kale oo gaadiid ah. Safarku wuu dheeraa, jidkuna wuu adkaa. Ugu dambayn waxay gaadheen meeshaas xiran ee u dhexeysa dagaalka iyo nabadda. Safaad u dheer oo aan dhammaad lahayn ayaa yaallay, dad daallan, carruur gaajaysan iyo nafa rajo beelay ayaa buuxiyey. Sidee ayay ku heli lahaayeen gabar yar oo sidaas u yar dhexda dad intaas le'eg? "Asha, istaag," ayay Zuli ku tidhi, "meel fog ayaannu u nimid. Ma quusanayno. Guriga ayaynu kula noqon doonnaa Hayat!" Zuli waxay ka tirtirtay ilmada, kadibna way kala tageen si ay u baadi-goobaan. Indhaha Asha ayaa ku dhacay gabar yar oo xidhatay cambuur cas, timaha na ugu xirnaa xadhig cas. Way istaagtay, wadnaheeduna si xooggan ayuu u garaacay. Agteeda, xiddigtii yareyd ee weli iftiimaysay inkastoo ay daallanayd, waxaa taagnaa abbaheed—wuu wasakhaysnaa, laf iyo harag uun buu ahaa.

Waligeed Asha ma ay arag wax ka qurux badan gabadheeda. Indhaheedu waxay qabteen iftiin yar oo ka dhex baxayay daalka iyo boodhka—gabadheedu waxay u iftiimaysay sida xiddig yar oo keligeed cirka ku taala. Waxay xasuusatay maalintii ay dhalatay, markii ay aragtay wejigeeda yar, iyo markii faraha yaryar ee buuran ay si xooggan ugu qabteen farta yar ee Asha. Halkaas ayay ka ogaatay: taasi waa xooggeeda, taasi waa waxa ay ku noolaanayso. Xataa dhexda burburka iyo rajo-beelka ugu daran, waxay nafteeda ugu ballanqaadday in marna, weligeed, cidna aysan kala fogayn doonin iyada iyo gabadheeda.

Asha mar dambe ma oggolaan doonto in cid kale go'aamiso cidda noolaanaysa ama sida ay u noolaanayso. Arrintaasi way dhammaatay. Gabadheedu xaq bay u lahayd inay si xor ah u korto, iyada oo aan lagu xukumin waxa bulshada ka fikirto ama rumaysato. Mar ayay dareentay inay ku dhowaatay inay waaydo, balse hadda oo ay mar kale wada joogeen, ma quusanayso. Waxay heli doontaa shaqo, wax bay baran doontaa, waxayna ilaalin doontaa gabadheeda. Mar dambe ma oggolaan doonto in wixii iyada lagu sameeyay lagu celiyo. Hayat way wax baran doontaa, way shaqayn doontaa, waxayna guursan doontaa qof ay iyadu doorato.

Asha neef dheer bay qaadatay. Markaas ayay garatay in gabadhu ay baqday, maadaama ay si aad ah u qabsanaysay. Wax yar ayay ka sii daysay, waxayna saxday xadhiggii timaha ee madaxa uga qalloocnaa. Markay wejigeeda eegtay, waxay ku aragtay dhammaan gabdhaha yar yar ee maalin kasta ku nool xaalado adag, haddana sii noolaada. Waqtigii ayay ahayd inay dhaqaaqaan. Waa inay halkaas ka baxaan.

Waxay ka jafjafday boodhkii cambuurka Hayat, gacmaheedana ayay ku qaadday, qalbigeeduna wuu degay. Kadibna waxay u jeesatay inay raadsato walaasheed. Iyada aya dib ugu celin doontaa gurigoodii.



Asha waxay iska furtay Hayat aabeheed, waxayna la degtay Nairobi Zuli iyo gabadheeda yar. Waxay ka heshay shaqo hay'ad caawisa qoxootiga ka soo barakacay dagaallada Somalia. Intii ay dadka kale uga caawinaysay inay helaan guri, iyaduna si hoose ayay u dhisanaysay gurigeeda. Zuli marwalbo waxaay sameysa xalwo, macmacaan yar ooy Hayat jecleed. Waxay eheed cudur daarka ugu wanagsanaa ay gabdaha walalaha iskugu yimadaan, ku qeybsadaan shaax, ayna ugu hadlaan noolashooda. Galab galbaha kamid ah, inti ay Asha xalwo ku siineyso Hayat buskud, waxay aragtay sidii aay gabadeeda uweynaatay. Malaha, waxay kufikirtay, in la gaadhay waqtigii aamusnaanta la jebin lahaa. Waxay fiirisay Zuli. Hadda oo ay labadooduba yihiin hooyooyin, malaha way ka hadli karaan waxaas —ku saabsan wixii lagu sameeyey iyaga.

Asha si tartiib ah ayay mara ugu tirtay afka Hayat, kadibna way toosatay oo indhaha ayay si toos ah ugu firisay walaasheed. “Ma oggolaanayo Hayat in aay marto wixii anaga nalagu sameeye. Marnaba.” Zuli waxay u soo dhaqaaqday dinaca miiskii, waxaayna gilisay qaandadii aay haysay saxaanki xalwadha, waxaayna ujeedsatay dhinac daaqadda. “gabar malihi weli,” ayaay si daggan u tidhi, “laakin hadii aan lahaan lahaa, kuma fasixi lahayn rafaadkaas iyadana.” Kaas ayaa ahaa wada hadalkii ugu horeeye kuwo badan. Way is dhageysteen. Waxay heleen erayadii ay ku muujin lahaayeen sida ay u dareemeen markaas—iyo sida ay u calaamadisay, si qoto dheer oo joogto ah.



Asha kuma joojinin meshaa. Waxaay bilaawday in ay lahadasho dumarka kale ee qoyska, iyo deriska oo qabeen gabdhaha. Hadalkaas yar wuxuu noqday abuurki *Save a Girl Save a Generation*. Waxay ka dhalatay garashada Asha in waxa dumarka u baahan yihiin ay tahay Goob ammaan ah —goobo ay ku hadli karaan, ku wadaagi karaan, oo ay ku hadli karaan cabsi la'aan: “hal gabadh badbaadi, waxaad badbaadineysaa qarni dan.” In kasta oo ay culayska dhaqanka iyo diidmada bulshada jireen, Asha waxay aragtay iftiin cusub oo suuragal ah. Wax walba way ka duwanaan karaan. Aamusnanti ay Asha jebisay may eheen teeda kalI ah—waxay kor u qaadday amusnaantii boqolaal dumar dunida daafaheeda oo ku dhiiraday in ay si kale u noolaadaan.

Sababtoo ah waxaa jira wax ka badan hal hab oo aad hore ugu socon karto nolosha. Oo sida Asha ay tirahdha: “Sheekada nolosheyda waxay ku qoran tahay cagahayga, weligay ma awoodin in aan talo badan, mar kasta oo aan arko cirbad ama dun, dib ayaa liigusoo celinayaa wakhtigaas.

Laakiin waxaan aaminsanay—si wada jir ah, waxaan abuuri karnaa shuruudaha loo baahan yahay si loo dhammeeyo dhaqankan.


Ma igu soo biiri doontaa?



## ASHA ISMAIL IYO SAVE A GIRL SAVE A GENERATION

Nolosha Asha mar kale way is beddeshay markii ay dib u guursatay. Waxay muddo ku nooleyd dalka Ecuador ka hor inta aysan ugu dambayn degin Spain. Halkaas ayay ku dhashay laba carruur kale. Waxay la kulantay xirfadlayaal caafimaad oo aan garanayn sida loo daweyo kuu soo maray gudniinka haweenka, Waxayna ogaatay in dumarka aay u baahan yihiin goobo ay ku helaan taageero iyo garab-joog waqtigooda bogsashada. Waxaa kale aay ogaatay aamusnanta hareereysan gudninka haweenka kuma koobneen bulshadeeda oo keliya—ay tahay arrin caalami ah. Malaayiin haween ah oo ku kala nool daafaha caalamka ayaa dhaqankan saameeyay, waxaana loo baahday wacyigelin dheeraad ah si loo ciribtiro. Garashadan ayaa horseeday aasaaska Save a Girl Save a Generation.

Waxay noqotay hayaad iskuxirta wadanka Kenya iyo Spain—waddo laba-gees ah oo sii kobceysa iyadoo wacyigelintu ay ku sii kordheyso xirfadlayaasha caafimaadka, booliska, dugsiyada, iyo kulliyadaha. Kooxahan ayaa hadda helaya tababar ku saabsan ka hortagga gudniinka haweenka iyo sidii loo taageeri lahaa haweenka ka badbaaday dardhadaan.



Badbaadeyalka kale oo u dagalamaay duni Gudninka haween kaxorowdhe.



Reene Bergstrom

Dhakhtar Mareykan ah iyo badbaade gudninka haweenka.



Nawal El Saadwi

Feminist, dhakhtar, iyo qoraa Masari; Agaasimiha guud oo hore ee waaxda caafimaadka guud ee Masar.



Masooma Ranaivi

Qareen Hindi ah iyo aasaasaha ururka We Speak Out.



Patricia Tobón Yagari

Qareen u dhalatay qowmiyadda Emberá, ka qaybqaadatay Guddiga Caddeynta Xaqiiqda ee Kolombiya.



Waris Dirie

Model caalami ah, qoraa, iyo Safiirkii hore ee Qaramada Midoobay ee ka dhanka ahaa gudniinka haweenka.



Adriana Kaplan

Cilmi-baare Argentine ah, aasaasaha NGO-ga Wassu Gambia Kafo.



Sophia Abdi Noor

Xildhibaanad hore ee Baarlamaanka Kenya oo gacan ka geysatay baasmarinta sharciga ka soo horjeeda gudniinka haweenka.



Ifrah Ahmed

Dhaqdhaqaaq Irish-Somali ah iyo aasaasaha Ifrah Foundation.

## DHALASHADA DHAQDHAQAAQ

Save a Girl Save a Generation waa hay'ad ka gaar ah dowlada oo ka shaqaysa la dagaallanka gudniinka haweenka, ka faa'ideysiga caruurta, guurka qasabka ah, iyo dhammaan xadgudubyadha ku salaysan jinsiyada. Waxaa aasaasay oo maamulay Asha Ismail sanadkii 2007, waxaana hoggaamiya dumar markii hore laga qaaday xuquuqdi ay ku hadli lahaayeen oo ay iskudifaaci lahaayeen iyagoo carruur ah. Ujeedkooda waa in ay hubiyaan in aysan jirin gabar kale oo u adkeysato wixii ay iyagu uso adkeysteen. Tan iyo markii la aasaasay, Hay'ada waxay mashaariic badan ka bilawday Kenya iyo Spain, kuwaas oo ka caawinaya ka hortagga gudniinka haweenka dumar iyo gabdho badan. Si wadhajir hay'adaha kale, waxay samaysay agab waxbarasho iyo waxqabad ku jihaysan si kor loogu qaado wacyigilinta iyo dhiirigelinta isbeddelka:

- Sida Looga Hadlo Gudniinka Haweenka:

<https://www.savegirlssaveageneration.org/imagenes/2022/II/How-to-talk-about-FGM.pdf>

- Gaadhista Ciribtirka Gudniinka Haweenka ee Qaarada Africa:

<https://au.int/sites/default/files/documents/42276-doc-GettingtozeroFGM-FinalWebPages-small.pdf>

- Tallaabooyin Silsilad ah oo lagula dagaallamayo Gudniinka haweenka iyo Guurka Qasabka ah:

[https://www.savegirlssaveageneration.org/imagenes/2022/II/CHAIN-Intervention-chain\\_Madrid\\_ENG.pdf](https://www.savegirlssaveageneration.org/imagenes/2022/II/CHAIN-Intervention-chain_Madrid_ENG.pdf)

- Mariama - Sheeko iyo Muuqaal - Mariama Ka daawo YouTubeka:

<https://unaf.org/publicaciones/cuento-mariama/mariama-ingles/>

<https://www.youtube.com/watch?v=yfm2HCroOtc>

- Hagidda Farsamada ee UNICEF oo kusabsan Gudniinka Haweenka iyo Waxbarashada:

<https://www.unicef.org/media/108641/file/FGM-Education-Note-English-2021.pdf>





## SHEEKOOYIN KA SOODA VALIENTAS COLLECTION

VALIENTAS Collection waa sheeko taxane oo la sawiray oo muujineysa dumaka wakhtigan ee dhisaya duni wanaagsan. Halqad kastaa wuxuu isku daraa muuqaal iyo sheeko si uu u soo bandhigo xaqiiqooyin adhag oo leh rajo iyo dareen, isagoo dad badan u soo jiidanaya ololaha isbeddelka.

**PROTECTORAS:** Halqadi kowaad, oo muujinaya haweenka u dooda xuquuqda aadanaha ee Abya Yala (Latin America) kuwaas oo lagu qasbay inay ka cararaan dhulkooda markii ay kahor imadeen shirkadaha waaweyn ee caalamiga ah ee wax soosaara.

**PODEROSAS:** Halqaddi labaad, oo soo bandhigaysa kooxda masraxa ee Las Poderosas iyo haween kale oo reer Guatemala kuwaas oo isticmaalay jilin si ay uga gudbaan dhibbanayaal iskugu badalaan ka badbaade-yasha rabshadaha kusaleysan jinsiyada.



## MAXAY SHEKADHAAN SIDAAS MUHIIM UGUTAHAY?

Gudniinka haweenka waa mid ka mid ah xadgudubyada ugu xun ee lagu sameeyo xuquuqda aadanaha ee haweenka iyo gabdhaha. Waa qaab xakameyn ah oo ka dhashay nidaamka ragga u dhexeeya, kaas oo loogu talagalay in lagu xadidho laguna qeexo doorka haweenka ee bulshada.

Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) waxay gudniinka haweenka ku qeexdhay habraacyo ku lug leh ka saarista qayb ahaan ama wadarta guud ee xubinta taranka haweenka ee dibadda, ama dhaawacyada kale ee xubnaha taranka, sababo aan caafimaad ahayn. Gudniinka haweenka ahi waxa uu leeyahay cawaaqib xumo jidheed iyo mid shucuureed: dhiigbax, caabuq, galmo xanuun badan, dhibaato ku timaada dareemida raaxada galmada, dhibaatooyin xiliga dhalmada, iyo xitaa dhimasho.

Maanta, in ka badan 230 milyan oo dumar iyo gabdho ah oo adduunka ayaa lagu sameeyay gudniinka haweenka, badhanaana ilaa 30 waddan — 22 ka mid ah waxay ku yaalliin qaarada Afrika, Bariga Dhexe, iyo qaybo ka mid ah Aasiya. Waxaani maaha tirokoob kaliya; waa dad dhab ah oo leh sheekooyin dhab ah—230 milyan oo xaajiqa xanuun badhan iyo adkeysii.

In kasta oo gudniinka laga mamnuucay 44 waddan, Gudniinka haweenka wuxuu ku sii socdaa si qarsoodi ah ama hab-dhaqanada xuduudaha ka gudba—halkaas oo gabdaha laga soo kaxeeyo waddamada uu dhaqankan mamnuuc ka yahay ayagoo lageynayo kuwa kale oo weli lagamamnuucin.

Faafitaanka gudniinka haweenka ee gudaha Maraykanka, Kanada, Yurub, Australia, iyo New Zealand iyada oo loo marayo socdaalka dadka wuxay muujinayaa sida bulshooyinka caalamiga ah badanaa ugu yartahay wacyigilinta iyo u diyaar galowga wax ka qabashada arrintan.

Heshiiski Istanbul (Heshiiska Golaha Yurub ee Ka Hortagga iyo La Dagaallanka Rabshadaha ka Dhanka ah Haweenka iyo Rabshadaha Gudaha Qoyska), oo dhaqan galay 1-dii Agoosto 2014 ayna ansixisay Spain, waa qalabkii ugu horreeyey ee sharci ahaan waajib ka dhigaya gudaha Yurub wax ka qabashada rabshadaha haleela haweenka nucaadiisa dhamaan—oo ay ku jirto gudniinka haweenka. Heshiiskaas wuxuu dalbanayaa in dowladuhu si buuxda mas'uuliyad uga qaataan ka hortagga, ilaalinta, iyo dacweynta.



## JOOJIYAASHA AMUSNAANTA: SHEEKO DHIIRRIGELIN LEH

JOOJIYAASHA AMUSNAANTA waxay ka sheekaynaysaa qisada haweeney rumaysnayd in wax walba ay ka duwanaan karaan—haweeney ku dhiirratay inay gabadheeda ka badbaadiso jarista xubinta taranka haweenka. Waa marag-fur muujinaya adkaysigeeda, raadinta codkeeda gaarka ah, iyo deeqnimadeeda ay casharradeeda ula wadaagto si ay noloshu u beddesho.

Asha Ismail waxay la wadaagaysaa waayo-aragnimadeeda ku saabsan jarista xubinta taranka haweenka, ma aha oo keliya si ay uga sheekayso xanuunkeedii, balse si ay uga shaqayso dabar-go'a dhaqankan. Safarkeeda ayaa weli dhiirrigelinaya haween kale tan iyo maalintii ay ka ilaalisay gabadheeda Hayat masiir la mid ah.



Sheekadeedu, dhab ahaantii, waa sheekada malaayiin haween ah. Daafaha dunida oo dhan, haween geesiyaal ah oo horseed u noqday isbeddel ayaa ka dhigay xadgudubkan xuquuqda aadanaha mid muuqda, iyaga oo kiciyay tallaabooyin lagu joojinayo. 6-da Febraayo waxaa caalamka looga aqoonsan yahay Maalinta Caalamiga ah ee Dulqaad-la'aanta Eber ee Jarista Xubinta Taranka Haweenka. Hase yeeshee, halganku weli ma dhammaan.

Sheekadani waxay inoo yeeraysaa—iyadoo loo marayo naxariis, wacyigelin, iyo walaaltinimo—inaan la soconno Asha iyo haween aan la tirin karin si loo gaaro dabar-go'a buuxa ee jarista xubinta taranka haweenka.

Asociación MÁS MUJERES  
[www.masmujeres.org](http://www.masmujeres.org)

**Facebook:**  
Colección Valientas—Más Mujeres

**Instagram:**  
[@masmujeressarea](https://www.instagram.com/masmujeressarea)





## QALABKA ISBEDELKA

Sheekada sawiran ee **JOOJIYASHA AMUSNANTA** waxay na tusiinsaa iyadoo loo marayo dhacdo dhab ah in isbedelku suuragal yahay, isla markaana cadaalad-darrada la hor istaagi karo. Waxay nagu dhiirigelisaa inaan kaano oo aan ku dhawaaqno: maneeyso gabadh kale! Waxay nagu boorinaysaa inaan difaacno jiritaanka jireed iyo maskaxeed ee gabadh kasta iyo haweeney kasta oo dunida ku nool. Sida sheekooyinka kale ee ku jira Ururinta **VALENTAS**, tani waa wax ka badan sheeko kaliya—waa qalab lagu beddelo maskaxaha, lagu taabto qalbiyada, isla markaana lagu dhiirigeliyo dad badan inay ka qayb qaataan dhisidda adduun ay haweenku kaga noolaadaan xorriyad dhammaan noocyada rabshadaha. Sida sheekooyinka kale ee ku jira **VALENTAS** collection, tani waa ka badan tahay sheeko kaliya—waa qalab lagu beddelo maskaxda, lagu taabto qalbiyada, isla markaana lagu soo jiito dad badan si ay uga qayb qaataan dhisidda adduun ay haweenku ugu noolaadaan xorriyad kadanka ah rabshadhaha dhamaan.



COLECCIÓN  
VALENTAS

